



## **Shuruudaha Tallaalka COVID-19 oo loogu talagalay Qandaraaslayda iyo Tabarucayaasha Magaalada ka shaqeeya**

Laga bilaabo Diisambar 5, 2021, si loogu hoggaansamo [Amarka Fulinta ee Dugda Magaalada Durkan 2021-08: Shuruudaha Tallaalka ee Qandaraaslayaasha Magaalada COVID-19](#), dhammaan qandaraaslayaasha magaalada ka shaqeeya goobaha qof ahaan loo xaadiro waxaa looga baahan yahay in ay si buuxda u qaataan talaalka COVID19. "Qandaraasleyda" waxaa ka mid ah ganacsiyada ama shakhsiyadka bixiya alaaboo iyo adeegyo, adeegyo la-talin ah ama adeegyada hawlaha guud sida dhismaha magaalada.

Fadlan dib u eeg [shuruudaha tallaalka ee qandaraaslaho \(www.seattle.gov/contractorvax\)](#) si aad u ogaato haddii Shuruudaha Tallaalka COVID-19 uu khuseeyo adiga ama ganacsigaaga. Shuruuddan kuma khusayso haddii aad magaalada kala shaqeyso telefoonka ama khadka internetka oo kaliya oo aadan weligaa qof ahaan aad u soo xaadarin. Shuruuddan sidoo kale kuma khusayso haddii aad goobta qof ahaan ka shaqaynaysid waqtii aad u yar - sida dhigista alaabta iyo waxii la mid ah.

Dhammaan qandaraaslayda ganacsiga la leh Magaalada ee buuxiya shuruudaha amarkan waa inay si elektaroonig ah u soo gudbiyaan Foomka Cadaynta Tallaalka, oo laga heli karo <http://www.seattle.gov/contractorvax>, ugu dambayn **December 5, 2021**.

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan dib u eeg ilaha soo socda (Ingiriisi):

- [Shuruudaha Tallaalka ee Qandaraaslaho \(www.seattle.gov/contractorvax\)](#)
- [Meelaha laga helo Tallaalka Bilaashka ah \(www.seattle.gov/mayor/covid-19/vaccinations\)](#)
- [Su'aalaha inta badan la is weeydiyo ee Shuruudaha Tallaalka Magaalada iyo Qandaraaslaho](#)

Haddii aad qabto su'aalo ama aad u baahan tahay tarjumaan, fadlan weydii shaqaalaha Magaalada aad la shaqeyso ama u dir [FAS\\_PC@seattle.gov](mailto:FAS_PC@seattle.gov).